



STATE OF WASHINGTON
DEPARTMENT OF SOCIAL AND HEALTH SERVICES
Developmental Disabilities Administration (DDA)

Heshiiska Isfahamka Guriga uu Leeyahay Adeeg-bixiyaha Cadaynta Kiraystaha

Provider-Owned Housing Memorandum of Understanding Renter Attestation

Sida ku xusan Siyaasadda 4.02, hay'adda bixinaysa Nolosha La Taageero (SL), maamule, xubin guddiga ka tirsan, ama mulkiilaha iska leh guryo ay kiraysteen macaamiisha ay u adeegaan waa in ay soo gubdbiyaan qoraalka Ka-reeban Siyaasadda (ETP) kaas oo ay tahay in uu saxiixo xoghayaha kaaliye ku-xigeenka ama qofka loo wakiishay.

Iyadoo uu la socdo ETP-ga la codsadey, Heshiiskan Isfahamka Guriga uu Leeyahay-Adeeg-bixiyaha waa in uu saxiixo kireyste kasta iyo/ama cid wakiil ka ah, kaas oo ku wargelinaya xuquuqdooda inta ay ku nool yihiin guriga uu leeyahay-adeeg-bixiyaha oo ayna ka helayaan taageerada degaanka adeeg-bixiyaha.

Hay'adda: _____

Cinwaanka Guriga: _____

Waxaa la sheegay oo la fahmay in ka-qaybgale kasta ee galaya ama hadda ku nool gudaha guriga uu adeeg-bixiyuhu leeyahay ee qaadanaya adeegyada SL wuxuu leeyahay xuquuqahan soo socda:

- In uu meel walboo uu doorto kaga noolaado gudaha goobta adeegga ee adeeg-bixiyaha.
- In uu ka guuro guriga uu adeeg-bixiyuhu leeyahay iyo in uu ka sii helo adeegyada baxnaaaninta guriga adeeg-bixiyaha.
- In uu waqti kasta codsado in uu u guuro guri kale oo ku yaalla gudaha goobta adeegga ee adeeg-bixiyaha.
- In uu saxiixo oo uu helo nuqulka heshiis kirada ee uu la galey adeeg-bixiyaha.
- Waxaa intaa dheer, macmiilka, wakiilkooda sharciga ah, hadday mid leeyihiin, iyo adeeg-bixiyaha SL waxay qirayaan oo ay fahamsan yihiin kuwan soo socda:
 - Waa ikhtiyaar uu macmiilka leeyahay in uu kireysto guri uu leeyahay adeeg-bixiyaha.
 - Adeeg bixinta adeeg-bixiyahan SL kuma xirna deganaanshaha guriga uu adeeg-bixiyuhu leeyahay.
 - Gurigan wuxuu hoos imaanayaa gudaha qeexidda guriga uu adeeg-bixiyuhu leeyahay sida ku xusan Siyaasadda DDA 4.02 wuxuunna ka soo baxayaa shuruudaha loogu talagalay goobaha uu adeeg-bixiyuhu leeyahay ee ku qoran xeerka 42 CFR 441.301(c)(4)(vi).
 - Macaamiishu waxay xaq u leeyihiin in ay gurigooda joogaan xitaa marka aysan adeegyo ka helayn mulkiilaha guriga. Guri ka saarid kasta ee la tixgeliyo waa in ay raacdaa sharciyada mulkiilaha-kiraystaha.

MAGACA MACMIILKA

HADDII AY KU HABBOON TAHAY, MAGACA WAKIILKA SHARCIGA AH EE MACMIILKA

SAXIIXA WAKIILKA SHARCIGA AH EE MACMIILKA / MACMIILKA

TAARIIKHDA